Public Health
Seattle & King County

# Cune Xanuun iyo Qandhada Casaanka leh

**Waalidka ama Masuulka Qaaliga ahoow,**

**Waxaa laguu siinayaa xaashidaan xogeed:**

- ☐ **Sababtoo ah adiga ama canugaada ayaa laga yaaba inuu idin soo gaaray cudurka.**
- ☐ **Si laguu siiyo macluumaad/xog.**

---

## Xogta Guud Ee Ku Saabsan Cune Xanuunka iyo Qandhada Casaanka leh

**Waa maxay cune xanuun iyo qandhada casaanka leh?**

- Cune xanuunka waxaa sababa bakteeriyada Streptococcus ee kooxda A.
- Qandhada casaanka leh waxay dhacdaa marka bakteeriyada Streptococcusee kooxda A ay jirka ku soo dhex saarto sun sababaysa finan. Khasab ma aha in qof kasta oo qaba cudurka cune xanuunka ay ku dhici doonto qandho casaanka leh.

**Yay ku dhici karaan cuduradan?**

- Qof kastaa wuu ku dhici karaa cune xanuunka, laakiin wuxuu ku badan yahay carruurta jirta da'da dugsiga iyo dhaliyerada.
- Cune xanuunka kuma badna carruurta ka yar 3 sano jir.
- Qandhada casaanka leh ayaa inta badan lagu arkaa carruurta da'doodu u dhaxayso 3 iyo 18 sano jir.
- Carruurta qabta qandhada casaanka leh guud ahaan kama xanuun/jiro badna kuwa qaba cune xanuunka.

**Waa maxay astaamaha cudurada?**

- Cune xanuunka:
  - Qandho (American Academy of Pediatrics (Akademiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta)) waxay qandho ku qeexaan heerkul dhan 100.4ºF [38ºC] ama ka sarreeyo)
  - Cune xanuun
  - Qumanka oo barara
  - Qanjirrada ku jira aagaga qoorta iyo cunaha oo barara
  - Astaamaha kale waxaa ka mid noqon kara madax-xanuun, calool xanuun, lallabbo, ama matag.
  - Carruurta da'doodu ka yar tahay 3 jir si dhif ayay u yeeshaan cune xanuun laakiin waxay yeelan karaan san duuf leh oo wata ur xun oo afka ka soo baxa, qandho, xanaaq dhowi, iyo cunto rabitaan la’aan.
- Qandhada casaanka leh waa finan cas oo maqaarka ka dhigaya sidii warqad ciid ku daaday oo kale.
  - Finanka ayaa aad uga guduudan gudaha suxulka, kilkilooyinka, iyo gumaarka.
  - Aagga afka ku wareegsan ayaa u ekaan kara mid midab cadaan xigeen ah leh.

---

**Sidee ayay bakteeriyada *Streptococcus* ee kooxda A u faaftaa?**

- Bakteeriyada sababta cune xanuunka iyo qandhada casaanka leh waxaa laga helaa dhibco ka yimaada qufaca, hindhisada, dhareerka (candhuufta), iyo sanka duufka leh.
- Waxay bakteeriyadu faafi kartaa marka qofka qaba cune xanuunka ama qandhada casaanka leh uu qufaco ama hindhiso oo qof kalana uu neefsado dhibcahaas.
- Waxay bakteeriyadu sidoo kale ku faafi kartaa in alaabta macuunta ama koobabka lala wadaago qof qaba cudurada cune xanuunka iyo qandhada casaanka leh.
- Iyadoo ay yar tahay, bakteeriyadu waxay sidoo kale faafi kartaa marka qofku taabto shay ama sagxad sare oo ay bakteeriyada dulsaaran tahay kadibna aad isla gacantaas ku taabato afka, indhaha, ama sanka.
- Maadaama finanka qandhada casaanka leh ay yihiin jawaab celinta uu jirka ka bixinayo sunta, finanka lama kala qaado, kumana faafaan taabasho.

---

## Sidee Ayaan Ku Ogaanayaa In Canugeygu Qabo Cudurada Cune Xanuunka ama Qandhada Casaanka Leh?

Daryeel-bixiyaha caafimaadka ayaa wuxuu iswaab/suufka dheecaanka ka qaadi kara dhuunta si uu u baaro bakteeriyada sababta cune xanuunka iyo qandhada casaanka leh.

**Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah ama aad ka walaacsan tahay in canugaagu qabo cudurada cune xanuunka ama qandhada casaanka leh, la xiriir daryeel-bixiyahaaga caafimaadka. Xaashidaan xaqiiqada waxay ku siineysaa macluumaad guud oo keliya.**

---

## Kawaran Haddii Canugeygu Uu Qabo Cudurada Cune Xanuunka ama Qandhada Casaanka Leh?

**Sidee ayaa loo daaweeyaa cune xanuunka iyo qandhada casaanka leh?**

- Labada cudurba waxaa lagu daaweeyaa antibiyootig oo uu qoro daryeel bixiye.
- Nafaas sii carruurta, u oggolow inay nastaan, xaqiiji inay cabbaan cabitaanno fara badan si looga hortago fuuq-baxa, oo had iyo jeer hubi.
- Dhallaanka 3 billood jirka ah ama kayar ee qaba qandho 100.4ºF (38ºC) ah ama ka sare waa inay eegaan daryeelayaashooda caafimaadka.
- Kala hadal dhakhtarka canugaaga haddii aad wax walaacyo ah ka qabtid astaamaha canugaaga. Haddii canugaagu ay ka muuqdaan calaamadaha fuuq-baxa (xafaayad qoyaan yar leh ama kaadi sidii caadiga ahayd ka yar, ka daal badan yahay sida caadiga ah, dawakhsanaan, carrab ama bishimo qalalan, ilin yar) wuxuu u baahan yahay inuu si dhakhso leh uu u arko daryeel bixiye caafimaad.

**Sidee ayaan uga hortagi karaa in bakteeriyada *Streptococcus* ee kooxda A ay faafto?**

- Had iyo jeer ku dhaq gacmaha saabuun iyo biyo diirran, gaar ahaan kadib marki aad hindhisto, qufacdo, ama aad tirtirto sanka.
- Dabool sankaaga iyo afkaaga markaad qufacayso ama hindhisayso.
- Ka fogow taabashada indhahaaga, sankaaga, ama afkaaga.

- Ka fogow la wadaagista koobabka, maacuunta wax lagu cuno, cuntada, iyo cabitaanka qof kasta oo qaba cudurka cune xanuunka.
- Guud ahaan nadiifi boombalada iyo alaabo-alaabeyda kale ee ay carruurtu afka gashtaan adigoo ku dhaqaya saabuun iyo biyo.

---

## Canugeygu Ma Wuxuu Ubaahan Yahay Inuu Iska Joogo Guriga oo uu Ka Haro Goobta Xannaanada Carruurta?

**Haa**, carruurta qaba cune xanuunka iyo qandhada casaanka leh waxay u baahan yihiin inay guriga iska joogaan. Waxay ku soo laaban karaan xarunta daryeelka carruurta 12 saacadood kadib markay bilaabaan qaadashada antibiyootiga ilaa inta ay dareemayaan inay qabaan caafimaad ku filan oo ay kaga qaybqaataan hawlaha fasalka.

**Fadlan raac siyaasada barnaamijka xannaanada ee canugaaga.**

---

### Tixraacyada

American Academy of Pediatrics (Akademiyada Mareykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta)

- Managing Infectious Diseases in Child Care and Schools, 6th Edition. Pages 179-180
- Caring for our Children, Chapter 3 Health Promotion and Protection, 3.6 Management of Illness, 3.6.1 Inclusion/Exclusion Due to Illness

Centers for Disease Control & Prevention (Xarumaha Xakameynta & Kahortagga Cudurrada)

- Group A Streptococcal (GAS) Disease. https://www.cdc.gov/groupastrep/diseases-public/strep-throat.html